

HABKA CUSUB EE LOO SOO GUDBIYO

BEDELAADA ARDAYDA 2024 - 25

MIYAAD OGTAHAY?

- Bedelka dugsiyada sanadka badhtamihiisa waxaa lala xiriiriyey inay waxbarashada ardayga ka lunto iyo haddii ay suurtagal tahay in laga hortago bedelkaasi.
- Inta badan dugsiyada PPS iyo barnamijyadoo waxay leeyihiiin **Tiro xadidan ama boos uguma bannaana** ardayda cusub ee bedel doonka ah, gaar ahaan dugsiyada dhexe iyo dugsiyada sarre.

SABABAASI DARTOOD, CODSIGA BEDELADA BADHTAMAHAA SANADKA WAA INUU KA BILAABMAA LA TASHIGA IYO SOO GUDBINTA ARDAYGA EE DUGSIGA HADDA UU WAX KA BARTO EE DUGSIYADA PPS.

SHRUUUDAHAN SOO SOCDAWAXAY U QALMAAN IN MUDNAANTA LA SHIYO BEDELKA:

- Ardayda codsanaya inay iska bedelaan dugsiga ay hadda wax ka bartaan ka dibna ay iska diiwaangalinaya dugsi ku yaala dariskooda.
 - Ogow: Codsga bedelka looma baahan haddii ardaygu iska diiwaangalinayo dugsiga dariskooda ka dib marka uu wax ka barnayey dugsiyada jaartarta ah ama dugsiyada badiilka ah
- Ardayda mid ama ka badan oo walaaladdii ay hadda wax ka bartaan dugsiga uu codsaday
- Barnaamijyada Waxbarashada Lagu Barto Labada Luqadood (DLI), ardayda ku hadla luqada uu barnamijka diirada saarayo ee ay guriga kaga hadlaan iyaga oo aan hadda ka diiwaangashaneyn barnamijka DLI ee Dugsiyada Dadweynaha Portland
- Ardayda ay haysato dhibaatada deganaanshaha la'aanta hoyga ama ay soo gudbisay DHS-tu
- Kuwa kale ee la xaqijiyeey inay haysato dhibaato la ogyahay

SIDA LOO CODSADO BEDELKA BADHTAMAHAA SANADKA:

- La xiriir la-taliyaha dugsiga aad hadda wax ka barato ama maamulka haddii aad aaminsan tahay in ilmahaagu uu waajahayo **dhibaato daran oo saameyneysa caafimaadkooda, nabadgelyadooda ama horumarka waxbarashada.**
- Waxay ka hadli doonaan welwelkaaga iyada oo ay kaala shaqeeyn doonaan sidii loo aqoonsan lahaa in xaaladda wax laga qabto.
- Haddii aad wali xiisayneyso inaad iska bedesho dugsiga, shaqaalaha dugsiga aad hadda wax ka barato ayaan waxay soo gudbin doonaan codsigaaga iyaga oo adiga kaa wakiil ah.
- Inta badan codsiyadu waxay Xarunta Dhexe ee Isdiwaangalinta iyo Bedelka ka heli doonaan natijjada codsigooda hal ilaa labo todobaad gudahooda.
- Xitaa ardayda u qalanta bedelka waxaa suurtagal ah inaan la ansixin haddii ay jirto boos la'aani dugsiyada ay codsadeen in loo bedelo. Ikhiyaaraadka dugsiyada dhexe iyo sare ee badiilka ah waxaa suurtagal ah in laga helo boos iyada la marayo Addeegyada Dib Ugu Soo Celinta Dugsiyada (Reconnection Services).
- Haddii ardaygaagu hadda uunsan ka diiwaangashaneyn dugsiyada PPS fadlan waxaad la xiriirtaa Xafiiska Isdiwaangalinta iyo Bedelka si aad ballan uga qabsato shaqaale ku takhasusay meeleynta ardayda adiga oo la-tashi kala sameyneysa meesha lagu meelaynayo ardaygaaga.*

BEDELAADA SANAD-DUGSIYEEDKA DUGSIYADA 2025-26

Waxaa la heli doonaa iyaga oo online ah ama aad tegto dugsiyada taariikhaha hoos ku qoran. Gudbinta codsiga bedelka looma baahna bedelka sanad-dugsiyedka soo socda, kaliya codsiyada degdeg ah ee lagu bedelayo dugsiyada inta lagu gudo jiro inta ka hadhay sanad-dugsiyedkani.

DUGSIGA DHEXE IYO DUGSIGA SARRE:

NOOFEMBAR 13, 2024 - DIISEMBER 16, 2024

DUGSIGA HOOSE IYO ACCESS ACADEMY:

FEBRAAYO 12, 2025 - MAARSO 12, 2025